

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 6aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2018

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2018

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

**2018**

**GO’AAN GOLE: ‘ANSIXINTA MAMNUUCIDDA JARISTA DHIRTA IYO DHOOFINTA DHUXUSHA**

**Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 99<sup>aad</sup> (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 100<sup>aad</sup> (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Soo Jeedinta Ra’iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda

**MARKUU ARKAY:** Xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira Bii’ada.

**MARKUU ARKAY:** **Sharci Lr. 6 ee soo baxay 25/-10/1969-kii, laguna mamnuucay Jarista, Gubidda Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha**

**MARKUU ARKAY:** Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.42.04.18 ee 19/04/2018**, kuna saabsanaa ansixinta “**Mamnuucidda Jarista Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha**” oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Muhiimadda ay leedahay mamnuucidda Jarista Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha.

***Wuxuu Xeeriyay***

**Qodobka 1aad**

Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.42.04.18 ee 19/04/2018**, kuna saabsanaa ansixinta “**Mamnuucidda Jarista Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha**” oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Iyada oo la Cuskanayo **Sharci Lr. 6 ee 25/10/1969**, waxa la mamnuucay Jarista Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha.

## Qodobka 3aad

Mamnuucidda Jarista Dhirta iyo Dhoofinta Dhuxusha waxa ay dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

*Ahmed Mohamed*  
Mudane Xasan Cali Khayre  
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

